JAMHUURIYADA SOMALILAND

GOLAHA WAKIILADA

Guddida Arimaha Gudaha Nabad-gelyada iyo Difaaca

Warbixinta Xeerka Booliiska JSL Ee Worshop-ka (13-14/2012)

Report Writer: Mubarik Farah Warsame

E-mail: Mubarikfarah8@hotmail.com

Web: Www.somalilandparliament.net

Submitted Date by: _____

1. Hordhac

Golaha wakiilada JSlee hada jira waxaa lasoo doortay 29 October 2005, Doorashadaas oo ahayd mid xor iyo xalaal ah

Golaha wakiiladu wuxuu ka koobanyahay 82 xubnood kuwaas oo kasoo kala baxay sadexda Xisbi eek ala ah Kulmiye,Udub iyo Ucid, Golalaha waxaa hogaamiye Gudoomiyaha iyo labada Gudoomiye ku xigeen xubnaha kale ee soo hadhayna waxay ku kala jiraan sideed gudi hoosaad oo goluhu ka koobanyahay.

Hadaba guddida arimaha gudaha nabad-gelyada iyo difaacu waxay kamidtahay sideeda gudi hoosaad ee goluhu ka koobanyahay,xubnaha guddida arimaha guduhu waxay ka koobanyihiin 10MPs oo leh qof caawiya, awoodaha gudida arimaha guduhu waxay ku qeexanyihiin xeer hoosaadka golaha Wakiilada waxaana kamid ah:-

- Inay la shaqayso dhamaan hay'adaha dawlada ee khuseeya arimaha nabad-gelyada
- Inay aasaasto xeerar ku saabsan Arimaha Guddahaiyo doorashooyinkaee wadanka
- Inay kormeeris iyo indho-indhayn ku samayso:-
    - ✓ Arimaha nabad-gelyada
    - ✓ Difaaca Wadanka
    - ✓ Dawladaha Hoose
    - ✓ Meleteriga
    - ✓ Booliiska
    - ✓ Doorashooyinka

2. Ujeedada Siminaarka

Ujeedooyinka ugu waaweyn ee siminaarkan loogu qabtay xeerka booliiska waxaa kamid ah

- ❖ In loosoo bandhigo xeerkan dhamaan cida ay khusayso oo ay kamid yihiin Ururada bulshada,Waaxyaha kala duwan ee Ciidamada Booliiska, Culimaa-awdiinta, Maxkamadaha,Xeer-ilaalinta, Dhalinyarada ,Odayaasha,Ardayda jaamacadaha, haweenka iyo xuquuqal insaanka
- ❖ In lasoo uruuriyo dhamaan waxyaabaha ay soo jeediyaan(Qodobada ay wax ka bedelaan ama kuwa ay wax kusoo daraan ee xeerka booliiska JSL)
- ❖ In la hubiyo in xeerkan dheelitiranyahay oo dhamaan bulshada qaybeheeda kala duwan uu dhex u yahay marka laga reebo xukuumada.
- ❖ In xildhinaada ay u fududaato samaynta xeerka kadib markay helaan fekrado kala duwan oo dhamaan ka hadlaya qodobada xeerku ka koobanyahay.

3. Day One

Guddida arimaha gudaha Nabad-gelyada iyo Difaacu waxay qabatay siminaar 13 November 2012 kaas oo ay u qabatay xeerka booliiska JSL waxaana kasoo qayb-galay dhamaan daneeyayaasha xeerka booliiska oo ay kamid yihiin booliisku.

Guddoomiye ku xigeenka ahna kusimaha gudoomiyaha gudida arimaha gudaha nabad-gelyada Xildhibaan C/raxmaan Maxamed Jaamac (Aw-Xoog) , oo furay kulankan ugu horayn wuxuu guddoomiyuhu u mahad celiyey kasoo qayb galayaasha siminaarka oo uu kamid ahaa taliyaha ciidanka booliiska Somaliland jen: Maxamed Nuur Fadal iyo sida ay wakhtiga u ilaaliyaan intaa kadib wuxuu gudoomiyuhu kusoo dhoweeyey taliyaha ciidanka booliiska oo isaguna tilmaamay muhiimada uu xeerkan samayntiisu u leedahay ciidanka booliiska Somaliland waxaanu u mahadnaqay kasoo qayb galayaasha iyo xubnaha gudida arimaha gudaha.

waxaa sidoo kale faahfaahin ka bixiyey ujeedada loo qabtay siminaarkan Xildhibaan Ibraahim Caraale Cabdi wuxuuna tilmaamay in ujeedada loo qabtay tahay sidii loo heli lahaa afkaaro kala duwan oo ku saabsan qodobada xeerkani xanbaarsanyahay hadhowna loogu dabakhi lahaa xeerka inta aan loo gudbin Golaha waxaa kale oo ibraahim sharaxay qaababka ay xeerarku ku samaysmaan oo ah sadex nooc mid xukuumadu usoo gudbiso golaha,mid goluhu curiyo iyo mid dad shacab ah oo gaadhaya ilaa 5,000 oo qof ay soo gudbiyaan.xeerarka ay xukuumadu golaha usoo gudbiso waxaa loo dhiibaa gudida ku shaqada leh oo iyana ka shaqaysa oo u bandhigta cida uu khuseeyo xeerkaasi iyadoo siminaaro u qabata, marka ay soo dhamaystirto gudidu wixii ay ku dartay ama fikirado ka soo ururisay dadkii uu khuseeyey ay kusoo darto, waxay dib ugu soo celisaa gole waynaha oo isna kasii doodam, markuu ansixiyana wuxuu usii gudniyaa golaha guurtida oo isna dibu eegis kusii sameeya oo madaxwaynaha usii gudbiya, kadibna marka uu madaxwaynuhu saxeexo ayuu sidaa ku dhaqan gala xeerku , Markaa xeerkan xukuuumada ayaa

soo samaysay oo golaha usoo gudbisay kadibna goluhu ayaa u soo gudbiyey anagoo ah gudidii ku shaqada lahayd si aanu uga soo xeerka usoo qabyo tirno golahana u horgayno sidaa darteed anagoo waajibaadkayagii gudanayna ayaanu maanta workshopkan idiin qabanay si aan idiinka qaybgelino samayntiisa maadaama tihiin cidii uu khuseeyey

Intaa kadib waxaa xeerka faahfaahin kasiiyey kasoo qayb galayaasha Xildhibaan Maxamed Xuseen X Ciise, wuxuu xildhibaanku tilmaamay inxeerkani uu ka koobanyahay 12 cutub oo ay ku jiraan 45 qodob oo dhamaan ka hadlaya arimaha booliiska, gaar ahaan in qaab dhismeedka ciidanka booliiska laga dhigo qaab civilian ah (Shacab) oo askariga laga soo dacweyn karo maxkamadaha shacabka .

3.1.Kelmada Kasoo Qayb Galayaasha

Xeerkan aan maanta u fadhinaa waa xeer xaasaasi ah, hadaan dib ugu noqdo xeerkan waxaa lasoo sameeyey waxbadan oo aan maanta halkan ku jirin ayaanu ka saaray siminaarkii ugu danbeeyey waxaanu ku galay imperial hotel , aadbaan idiinku mahadnaqaynaa bahalkaa aad nasoo gaadhsiiseen intaan la ansixin , waxaan soo jeedinayaa waa 45 qodob wax badan ayaan dooneynaa inaan ka hadalo oo si wada jir ah uga hadalo waxaan odhan lahaa aan qodob qodob uga wada hadalo, aynu bilowno inaynu qodob qodob isu dultaagno lkn

3.2.Taliyaha Ciidanka Booliiska

Waxan dooneynaa in waxasi ina anfaco , sababta aan u danaynaynaa waxaa ay tahay dee waan ku shaqaynaynaa, waxaan soo jeedinaynaa

Xuquuqul iinsaanka ismaaciil cabdi daahir

Aadbaan idiinku mahadnaynaa sida fiican , arimaha xuquuqal iinsaanku kumay taxaluqi jrirn arimaha bulshada, bilaysku wuxuu ka shaqeeyaa nabadgelyada taasi oo keenaysa inuu dadweynaha la macaamilo waxaa jira plice station , xeerkan daraasad ayaan ku samaynay waxaanu noqday waajibaad booliiska iyo waxaa loo baahanay in xuquuqdana awooda la saaro dhinaca waajibaadka waxaan soo jeedinlahaa in group gaar ah loo saaro , qodobka aad noogu muhiimka ahi waa qodobka la xisaabtanka taana waxaan jeclaa in group loo saaro , xeerku maanta ayuu gacanteena ku jiraa markaa waa inaan wax ka qabsano maanta

3.3.Diinta iyo awqaafta

Waa xeer laga soo shaqeeyey lagusoo dhibaatooday marka la leeyahay xuquuqul iinsaan waxa aad iyo aad aan u mahadnaqynaa dadkii hawshan loo diray ee halkaa soo gaadhsiiyey, wixi shareecada ka hor imanaya ayaanu anguna xeerka kasaaraynaa

Ugu danbayn waxaa kasoo qayb galayaasha loo qaybiyey kooxo ama groups kuwaas oo loo kala habeeyey sidan soo socota:-

Group 1 waxa ay ka shaqaynayaan 1--13

Group2 waxa ay ka shaqaynayaan 14—28

Group3 waxa ay ka shaqaynayaan 29—45

4. Day Two

Maalintii labaad ee xeerka waxaa gudoomiyaha gudidu faray kasoo qayb galayaasha in ay u fadhiistaan qaabkii kooxaha ahaa ee loo qaybiyey kana hadlaan oo lafa guraan qodobada ama cutubyada koox kasta oo ka mid ah kasoo qayb galayaasha siminaarka loo xilsaaray.

4.1.Waxyaabaha kasoo baxay siminaarka.

Xog ururinta qabyo-qoraalka xeerka booliiska JSL waxaa kasoo baxay in qodobadan soo socda wax ka bedel iyo kaabis lagu sameeyo waxaanay kala yihiin:-

Groups

"**Saldhig**"=Ciidan heer degmo

"**Rug-booliis**" waa ciidan hoos yimaada saldhiga

"**Sarkaa**l" Sarkaal waxa loola jeedaa marka sharcigan la eegayo, xubin kasta oo leh darajo ka sarraysa Askari Boolis ah(sida xeerka ku taal)

Waxaa loo bedeley:-

"Sarkaal" waxaa loola jeedaa laba alifle iyo wixii ka sareeyo sida uu tilmaamayo xeerka habka ciqaabta qodobkiisa 23aad

"**Layli-Sarkaal**" waxaa loola jeedaa layli loo tababarayo sarkaalnimo

"**kormeere**" Waxaa loola jeedaa, kormeere 1aad ,2aad iyo 3aad.

"**Saraakiil xigeen**" waxaa loola jeedaa 2-3 alifle

Askari Booliis ah:Askari boolis ah waxa loola jeedaa xubin kasta oo ka tirsan Ciidanka Booliiska Somaliland oo aan darajo lahayn(sida xeerka ku taala)

Waxaa loo bedeley:-

"**Askari Booliis**" Askari boolis ah waxa loola jeedaa xubin kasta oo ka tirsan Ciidanka Booliiska Somaliland oo (Alifle-dable)

"**Layli dable**" waxaa loola jeedaa xubin cusub oo loo tababaro askarinimo.

Qodobka 3aad: Farqadiisa 4aad oo ah

"Waa in Booliiska Somaliland, loo tababaro, loonna habeeyo qaab Booliis Rayid ah"
waa in meesha laga saaro isaga oo ka hor imanaya qodobka 124 aad ee dastuurka Somaliland iyo xeerkan laftiisa

Qodobka 6aad

(2) kelmada hirgelinta waa in lagu bedelaa (fulin)

"Hirgelinta Dastuurka iyo shuruucda Jamhuuriyadda Somaliland"

Qodobka 7aad

Xarumaha waa in lagu bedelo (Xarunta)

"Xarumaha dhexe ee hoggaaminta ciidanka Booliisku waa Caasimada Somaliland"

Qodobka 12aad

(a) Taliyayaasha waa in lagu bedelo (Taliyaha)

(b) (c) iyo (e) waa in meesha laga saaro,waayo waxaa ay ka hor imanayaan awoodaha taliyaha ciidanka booliiska ee ku xusan qodobka 19aad

(a) "Wuxuu kala taliyaa Madaxweynaha magacaabista iyo xil ka qaadista Taliyayaasha iyo T/xigeenada Ciidanka Booliiska Somaliland.
(b) Abuuridda qaybo/laamo cusub oo ka mida ciidanka Booliiska Somaliland isaga oo la tashanaya taliyaha ay khusayso.
(c) Soo saarista xeernidaamiyaha xeerkan isagoo la tashanaaya taliyaha Ciidanka.
(d) Soo saarista tilmaamo, hagayaal guud oo lagu fulinayo siyaasada Qaranka iyo qorshayaasha amaanka dalka la xidhiidha.
(e) Wuxuu kala taliyaa Taliyaha Ciidanka Booliiska Somaliland, magacaabista, bedelka iyo xil ka qaadista Hogaamada iyo taliyayaasha Qaybaha. "

Qodobka 13aad

Waa in laga dhigaa Cabashada maamul

"Cabashada ka dhanka ah Ciidanka Booliiska."

Qodobka 16aad

Xarafta (m) inay u diyaar ahaadaan xili kasta, meelkasta shaqada loo igmaday

"In ay ka soo baxaan dhamaan hawlaha shaqo una sameeyo wakhtiyo gaar ah oo uu gudanyo waajibaadkiisa shaqo"

Qodobka 16 aad waxaa lagusoo daray

"Inay ku shaqeeyaan tilmaamaha xeer ilaalinta guud ee qaranka.

Qodobka 17aaad farqadiisa **8aad** haloo raro xeer nidaamiyaha hana laga saaro xeerkan.

Qodobka 18aad t: Haloo bedelo " qaybo iyo fadhiyo madaxbanaan oo hoos tegeya taliska guud."

"Qaybo iyo Waaxo toos u hoostag Taliska**"**

Qodobka 19aad: waxaa lagusoo kordhiyey:-

"Taliye xigeenku waa hogaanka labaad ee ciidanka waxaana uu fulinayaa waxa uu taliyuhu u igmado.

Qodobka 19aad faqradiisa **4aad**(v) : haloo dedelo Taliyaha booliisku wuxuu awood u leeyahay dalacsiinta alfle---sadex xadhigle wixii ka sareeyana waxaa awood u leh madaxweynaha.

“Dalacaada darajooyinka ka hooseeya T/xigeenka Ciidanka Booliiska isagoo la tashanaaya Wasiirka Arrimaha Gudaha”

Qodobka 36aad: Waxaa loo bedeley” Hanti dhowraha qaranku masoo geli karo baadhis ahaan ciidanka booliiska, waxaana lagusoo geli karaa amar Madaxweyne kadib marka loo arko lagama-maarmaan.

“Hanti dhawrka Qaranku marka uu lama huraan u arko, waxa uu baadhis xisaabeed ku sameeyn kara Booliiska guud ahaan ama talis gaarka ah”

Qodobka 38aad farqadiisa **2aad**: Marka taliyaha qaybta/ama fadhiga madaxa banaani uu qanco in xubin ciidanka ahi gashay fal-denbiyeed mudan in maxkamad lagu horgeeyo waxaa loo gudbinayaa gal-dacwadeed hogaanka ciidanka, hogaankuna taliyaha ciidanka ayuu u soo gudbinayaa , taliyaha ciidanku kadib markuu ku qanco denbiga wuxuu u gudbinayaa Xeer ilaalinta guud ee maxkamada awooda u leh , Xeer ilaalintuna waxay eediisa u gudbinaysaa maxakamada , Maxakamada ayaana leh go’aanka kama danbaysta ah, taliyaha ciidanka waxaa u furan hadii uu arko in denbiga aanu cuslaan wuxuu ugu bedeli karaa ganaax.

Qodobka 40aad farqada**4aad** : Taliyaha saldhigu wuxuu wada shaqayn dhow la yeelanayaa guddoomiyaha golaha deegaanka wuxuuna isku xidhayaa rugaha iyo maamulka degmada

Xoghayaha Guddida Arimaha Gudaha Nabad-gelyada iyo Difaaca

Mubarik Farah Warsame